# Imtixaanka wadista baabuurta.

# Maxaa la filan karaa

Imtixaanka wadista baabuurka waxa lagu qiyaasaa awoodaada inaad si sharci ah oo badbaado leh u waddid baabuurka. Imtixaan qaade ayaa kula raacaya gaadhiga si uu u qiimeeyo xaalada gaari wadistaada. Iskuma dayi doonaan inay ku jahawareeriyaan, ku khiyaameeyaan, ama ku waydiiyaan inaad samayso wax sharci darro ah.

## Maxaa la igu imtixaamin doonaa?

Waxa lagugu imtixaami doonaa:

- **Inaad istaadho gaadhigaaga**.
- **Ka bixida kaabada jidka,** ma calaamada ayaad shidaa oo aad sugtaa ilaa inta ay amaan noqonayso in aad dib ugu laabato jidka?
- **Maamulida baabuurka,** miyaad:
  - Si sax ah ma u isticmaashaa badhanka gaaska ama leewarka, biriiga, isteerinka, iyo kontaroolada kale?
  - U beddel xawaarahaaga si aad ugu qiyaasto:
    - Tirada iyo xawaaraha baabuurta kale iyo dadka wadada lugaynaya.
    - Wadada iyo xaalada cimilada.
    - Dhismeyaasha.
    - Xadiga iftiinka.
    - Fogaanta aad wax ka arki karto?
- **Marka aad gaadhiga ku dhex wado wadada** miyaad:
  - Isticmaashaa haadka saxda ah?
  - Ma shidaa calaamada si aad u bedesho haadka?
  - Si taxadir leh ma u bedeshaa haadka wadada?
  - Ma u jirsataa baabuurta kale masaafo aamin ah?
  - Madaxaaga dib ma u jeedisaa si u eegto dib ka hor inta aadan bedelin haadka?
  - Calaamada ma shidataa marka aad marayso masaafo ku haboon ka hor inta aanad laabin?
- **Adeecida calaamadaha taraafigga iyo calamadaha** miyaad:
  - Ma u leexataa haadka saxda ah adiga oo aan jarin haadka ama si balaadhan u galin haadka saxda ah?
- **Ku dhex wadida baabuurka isgoysyada dadka indhaha la' ama ciriiriga ah,** miyaad:
  - Si taxadar leh u eeg calaamadaha, calaamadaha laydhka, dadka lugaynaya, iyo baabuurta kale?
  - U leexo oo si sax ah u qaado wadada saxda ah?
- **Joojinta**
  - Si habsami leh ma u istaagtaa isla goobta saxda ah?
  - Si degdeg ah oo badbaado leh ma u joojin kartaa marka ay jirto xaalad degdeg ahi?

# Imtixaanka wadista baabuurta.

# Maxaa la filan karaa

- **Dib u qaadista baabuurka ama reefaska.**
  - Ma eegtaa garabkaaga midig?
  - Dib ma ugu bixi kartaa laynka toosan ee wadada?
  - Si buuxda oo dhamaystiran ma muuli kartaa baabuurkaaga?
- **Masaafada xukunka,** ma joogsataa fogaan amaan oo ka fog:
  - Baabuurta kale marka aad daba socoto ama aad dhinac ka dhaafayso ama
  - dadka wadada socda ama ku dhexwada wadada.
- **Adiga oo tixgalinaya xuquuqda dadka kale.**
  - Ma ixtiraamtaa darawalada kale, dadka lugaynaya, iyo baaskiil wadayaasha?
  - Si buuxda ma ugu fiirsataa hawsha wadista?
- **Samaynta dhaqdhaqaaqyo gaar ah,** ma ku guulaysan kartaa inaad dhammaystirto dhammaan kuwan soo socda?
  - **Calaamadaha gacmuhu waxay calaamad u yihiin leexashada midig ama bidix oo tartiib ah ama istaajinta**. (Waxaa laga yaabaa inaad isticmaasho calaamadaha gacanta inta lagu jiro imtixaanka.)
  - **Imtixaanka falcelinta bareegga/ joogsiga degdega ah** - Waxaanu ku tilmaami doonaa inaad cagtaada saarto badhanka gaaska ama leewarka oo aad sida ugu dhakhsaha badan ugu talaabsato biriiga marka laguu sheego inaad joojiso.
  - **Dhigashada baabuurka meel buur** - Waxaan ku tilmaami doonaa inaad dhigato gaarigaaga sidii inaad uga tagto ogaysiis la'aan.
  - **Baarkinka baabuurta dhexdooda kuwaas oo wadada dhinacyaal** - Waxaan kuu tilmaami doonaa inaad dib ugu laabato meesha baabuurta la dhigto, oo u dhaxaysa laba baabuur:
    - Afarta calaamadood ee baarkinka.
    - Laba baabuur.
    - Ama hal baabuur oo leh gaadhi kale oo mala-awaal ah oo la dhigay xaga danbe ilaa ½ oo u dhiganta dhererka gaadhiga.
    - Ma isticmaali kartid astaamaha caawinta baarkinka inta lagu jiro dhaq-dhaqaaqa baarkinka ee barbardhiga baabuurta kale.
  - **Dib-u-celinta adiga oo ka baxaya waddada ama luuq-geynta taraafikada adoo isticmaalaya geeska wadada** - Waxaan ku tilmaami doonaa inaad ku celiso gaarigaaga meel geeska wadada ka mid ah oo dhinaca midigta ah. Waxaad u baahan doontaa inaad u dhawaato dariiqa cidhifka inta aad awooddo, adiga oo si amaan ah dib ugu sii baxaya laynka tooska ah ilaa laguu sheego inaad istaagto. Waxaa laga yaabaa inaadan isticmaalin kamarad dib-u-celinta inta lagu guda jiro farsamada samaynta dhaqdhaqaaqa.

# Imtixaanka wadista baabuurta. Maxaa la filan karaa

## Waxa laga yaabaa in muuqaaladani ku caawiyaan.

Waxaad ka heli kartaa Waaxda Shati bixinta (Department of Licensing) YouTube channel kan www.youtube.com/user/WALicensing

- Imtixaanka wadista baabuurka #1: Tijaabada imtixaanka ka hor
- Imtixaanka Wadista baabuurka #2: dhaqdhaqaaqa dib u kaxaynta
- Imtixaanka Wadista baabuurka #3: Barkinka isbarbar socda
- Imtixaanka Wadista baabuurka #4: Haad-beddelka iyo leexashada

## U diyaargaraw

Baro Washington Driver Guide (Hagaha Darawalnimada ee Washington), oo ku celceli dhammaantood Xusuusnow, waxaad u baahan tahay inaad tababarka la qaadato darawal shati haysta.

Waa inaad ku raaxaysataa wadida dhammaan xaaladaha taraafikada. Ogow shuruucda waddooyinka oo u hogaansan. Ku qaado imtixaanka gaadhi aad si fiican ug aranayso.

Sida dadka intooda badani yihiin, waxaa laga yaabaa inaad xoogaa ka naxdo galista imtixaanka baabuur wadista. Haddii aad ku celcelisay oo aad xasuusnaato talooyinka wadista baabuurka ee halkan ku taxan iyo Hagaha Darawalka, waxaad haysataa fursad fiican oo aad ku gudbiso isku daygaaga koowaad.

*Si amaan ah u wad baabuurka, nasiib wacan.*